Qaabka Barashadda
Dugsiyadda Guud ee Portland

Qiyaasta horumarka iyo Sal-xidhka halka la higsanayo

Dugsiyadda Guud ee Portland, shaqadeenu waxaa weeye in aan siino 46.000 oo arday tacliimaadka iyo caawinaadda ay u baahanyihiin in ay joogteeyaan, la qabsadaan ama ay soo gaadhaan heer ka sareeya halka loo asteeyey ee barashadda. Ujeedadeenu waxaa weeye in aan u diyaarino ardayda in ay ku najaxaan marxalad walba oo ay ku jiraan, si ay markaa ugu qalinjebiyaan waqtigii loogu talagalay, iyagii oo udiyaarsan kuliyadda, shaqadda iyo muwaadinnimadda.

Waana Sababta aan uleenahay cabir sal-xidhan - Baridayadu waxa ay ku qaabaysantahay - xajmiga najaxa furaha heerarka barasho, laga bilaabo bilowgaba illaa iyo qalinjebinta.

Sidoo kale waxaanu sal-xidhnay ahdaaf ku jeeda gudashadda waajibaadka ardayda si markaa aan ugu muuqano kuwa ay la xisaabtami karaan qoysaskooda iyo beesheena – iyo anagii oo ay noo muuqan karto stiraatiijiyadda waxbarasho ee shaqayn karta si aynu u helno maxsuul kan ugu hagaagsan.

Tayaynta ardayda ku jira marxaladaha bilowga ah

Waxaanu adeegsanaynaa furaha qiimaynta mid walba oo ka mid ah ujeedooyinka – iyadii oo laga bilaabayo natiijadda imtixaanka illaa iyo macluumaadka xaadiritaanka – si aynu uqiimayno najaxa dugsiyadda degmadena ee udiyaarinta ardaydeena najixidda fasalka xiga iyo wixii ka dambeeya.

- **Udiyaar ah Akhriska** – Bilowgaba fasalka koowaad, dhamaan ardayda waa in ay diyaar u yihiin in ay akhriyaan, markaa way haystaan asaas ku najixidda akadeemiyadda Mustqabalka.
- **U akhriya si ay ubartaan** – Dhamaadka fasalka sadexaad, ardaydu waa in ay akhrinayaan si ay u helaan fahamka dunidooda, maadooyin kala duwan.
- **U diyaar ah dugsiga sare** –Fasaladda dhexe, ardaydu waa in ay leeyihiin dabci adag ee ku jeeda xaairitaanka, iyo qoraalka, akhriska, iyo xisaabta si ay helaan faham dheer oo ku jeeda maadooyinka muhinka ah ee dugsiga.
- **Tubtii aad ku qalinjebin lahayd** – Marka ay galaan fasalka 10aad, ardaydu waa in ay baasaan maadooyinka ubucda u ah daraasadda iyagii oo ku gudbaya darajooyin xoogan, waana in ay haystaan saacado ku filan si ay u hayaan tubtii ay ku qalinjebin lahaayeen.
- **Ka qalinjebi dugsiga sare waqtigii loogu talagalay** – Ardaydu waa in ay leeyihiin mahaaradda looga baahanyahay kuliyadda ama shaqadda.

Sidii kale waxaanu eegaynaa najaxeena sidii aan ubuuxin lahayn halka maran, waxaanu qaabaynaynaa farqiga u dhexeeya qaab-gudashadda ardayda cadaanka ah iyo kuwa dhibcaha hoose hela ee qowmiyadaha kale ah xili waxbarasho oo kasta.

Waxaan u adeegsanaynaa macluumaadkaa si aan u gegtiro barnaamijyadeena waxbarasho, iyadii oo xooga la saarayo caawinta akadeemiyadeed ee aradyda sida ugu badan ugu baahan.

Waa in aan samaynaa tan ugu hagaagsan si aan wax u barno dhamaan ardaydeena si dhan oo isle'eg

Buuxinta dulduleeladda najaxa

Madhnaanshaha ugu balaadhan ee % fasaladda sadexaad waxa uu dhaafsiisanyahay qiimaynta akhriska OAKS



Madhnaanshaha ugu balaadhan % ee fasaladda todobaad waxa ay gaadhsiisanyihiin heerka OAKS ee qiimaynta akhriska



Madhnaanshaha ugu balaadhan % ee kuwa galaya fasalka 10aad waxa ay helayaan 6+saacadood mana jiraan maadooyinka ubucda u ah fasalka oo darajadda ka hooseeya C



For more detail on these measures and targets go to *www.pps.k12.or.us.*

Waxaanu higsanaynaa maxsuul wanaagsan

Sanadkan, Dugsiyadda Sare ee Portland waxay tiigsanaysaa ahdaaf ku jeeda sidii ay heer sare oga gaadhi lahaayeen ardaydu waxbrashadooda. Waxaynaan waxba kasoo qaadi doonin dhinacyadda qaar la saadaalin karo najaxa waqti dheer: Akhris goor hore ah, qoraalka fasaladda dhexe iyo helida saacado goor hore ee dugsiga sare.

Sannadka soo socda, waxaan doonaynaa in aan siyaadino najaxa dhinacyadaa dhibcaha 5 boqolkiiba inagii oo yaraynayna marnaanshaha najaxa ee dhinacyadaa dhibcaha 5 boqolkiiba.

Waxaanu nahay mas'uul tan la xidhiidha saxar-tirka dhinacyadaa furaha u ah barashadda, waayo mustaqbalka Portland waxa uu ku xidhanyahay hadba sida ay unajaxaan ardaydayadu.

Cabirka Maxsuulka: Qaabka Barashadda

1 Gelida Fasalka 1aad: Diyaar uyahay in uu akhriyo

- Ardaydu way garanayaan magacyadda xarfaha iyo dhawaqa iyo qaybo ka mid ah erayadda.

2 Gelida fasalka 2aad: Akhrinaya si uu ubarto

- Ardaydu waxay awoodaan in ay ka saramaraan halka uu asteeyey gobolku ee imtixaanka akhriska.

La Doonayaa: Sanadka 2009, % ee ardayda ah ee ka saramari doona halka uu u asteeyey goblku waxa ay kor udhaafi doonaan 5 dhibcood.



3 Sanadaha Dhexe: Waxay diyaar u yihiin Dugsiga Sare

- Xaadiritaanka Ardaydu waa 90% ama wuu ka sareeyaa.
- Ardaydu waa ay gaari doonan halka uu u asteeyey gobolka ee imtixaanka qoraalka.
- Ardaydu way qaadan doonaan kuna baasi doonaan algebradda fasalka sideedaad.

La Doonayaa: Sanadka 2009, % ee ardayda gaadhi doona halka loo asteeyey qoraalka fasalka 7aad waxay kordhi doonaan shan dhibcood.



4 Gelida fasalka 10aad: Waxa ay ku taaganyihiin tubtii ay ku qalinjebin lahaayeen

- Ardayda dhameeya fasalka 9aad iyagii oo hayst 6 saacadood iyo maadooyinak ubucda ah oo ay haystaan.

La Doonayaa: In 2009, % ee ardayda galaya fasalka 10aad iyagii oo wata 6saacadood iyo maadooyinak ubucda ah oo ay haystaan C waxay sara ukici doonaan 5 dhibcood.



5 Fasalka 12aad: Ee ku qalinjebinaya waqtigii loogu talagalay waa in ay diyaar u yihiin in ay Shaqo iyo Kuliyadaha

- Ardayda ku qalinjebinaya waqtigii loogu talagalay.
- Ardayda gaadhsiisan halka loo asteeyey ee udiyaar-garowga kuliyadda ugu yaraan sadex imtixaanadda ACT.

Portland Public Schools

Qaabka Barashadda ee Qoysaska

Su'aalo iyo Jawaabo

Q: Maxaa loola jeeda Qaabka Barashadda tan ku jeeda ardayda?
A: Barashadu waa furaha astaha laga eego sida ardaygaagu horumar oga samaynayo dugsiga. Barasho waliba waxa ay ku xidhantahay tan xigta. Hadii ardaygaagu diyaar u yahay in uu akhriyo goorta uu ku jiro fasalka koowaad, tusaale ahaan sida badan waxaa suuragal ah in uu u akhriyo si uu ubarto marka uu ku jiro fasalka sadexaad iyo afaraad.

Q: Muxuu yahay dowrkaygu si aan u caawiyo ardaygaygu si uu ugaaro/gaarto barashadeeda? Muxuuse yahay dowrka macalinku?
A: Wada shaqaynta macalimiinta iyo qoysaska - iyo ardayda – waa asaasi. Waydii macalinka ardaygaaga sida aad usaacidayn karto ardayda. Ka eeg macluumaad siyaado ah boggan.

Q: Sidee baan ku ogaanayaa in ardaygaygu gaadhay barashadda?
A:.Dugsiyadda Guud ee Portland waxay ka warbixin doonaan sanad walab heerka barashadda ardayda oo dhan, walow aysan si gooni ah oga hadli doonin barashadda warbixinta arday gaadh ah. La hadal macalinka ardaygaaga si aad u ogaato in isaga/iyadda ay tahay heerkii laga doonayay.

Q: Ardaygaygu waxa uu taaganyahay halkii lga doonayay xagga akadeemiyadda. Maxa macne ah oo ay noo samaynaysaa annaga?
A: Barashadu waxa ay kaa saacidayn kartaa in aad horay eegto si aad ubadkaaga ugu illaaliso halka laga doonayo.

Q: Barashadu ma wax u gooni ah baa Dugsiyadda Guud ee Portland.
A: Degmaddu waxa ay u adeegsataa macluumaadka waxbarashadda siyaabo kala duwan si ay sare ugu qaaado najaxa ardayda. Qaabkan waa wax gooni u ah, waxaanse fikradda kasoo qaadanay degmooyinka kale.

Q: Maxay Dugsiyadda Guud ee Portland isku dayayaan in ay ku gaadhaan barashadda?
A: Waanu ku samaynay dhamaan ardaydeena oo dhan heer walba oo ay yihiin. Taxliilinta heerka barasho ee ardayda waxa uu naga caawinayaa in aan aragno yaan weli diyaar u ahayn in uu gaadho halkii laga doonayay si markaa loo caawiyo.

Q: Sidee xoojinta barashadu u caawinaysaa gegtirka najaxa Dugsiyadda Guud ee Portland?
A: Dugsiyadda Guud ee Portland waxay xooga saartaa najaxa dhamaan ardayda iyo in la gegtiro farqiga u dhexeeya ardayda cadaanka ah iyo kuwa madoow. Heer walba oo barasho, waxaanu qiimaynaa heerka awoodeed ee aradyda si guud iyo si koox koox ahba , waxaanu sal-xidhnay heer aynu higsanayno si aan u badhaxtirno heerka tayadda ardayda iyadii oo la gegtirayo farqiga jira.

Q: Muxuu gegtirka farqigu muhim u yahay?
A: Awooda qarankeenu waxa ay ku xidhantahay sida uu qof walbiga diyaar ugu yahay loolan. Dugsiyadda Guud ee Portland waa in ay ku talaabsataa in ka badan tan imika ay bixiso si ay u tayayso barashadda ardayda oo dhan si loo simanyahay. Aradyda madoow waxay imika ku jihaysanyihiin xaalad liidata oo dhanka akadeemiyadda ah marka loo eego saaxiibadooda cadaanka ah. Gegtirka farqiga waxaa loola jeeda in meesha laga saaro taa iyadda ah.

Q: Iyadii oo la xoojinayo gegtirka farqiga, miyaa ardayda tayadoodu sarayso la iloobi doonaa?
A: Waxaan doonaynaa in dhamaan ardayda oo dhan la tuso korodh joogta ah, iyadii oo aan loo eegin barta bilowgoodii, tan aynu go'aanka ku gaadhnay ayaa ah najaxa arday walba.

Sidee u Caawin Kartaa Ardaygaaga

Xadaanadda iyo Dugsiga Hoose: Akhris
- U akhri maalin walba ubadkaag – lasaqa, astayaasha, buugta.
- Ubooqo maktabadda si joogta ah
- Ubadkaagu hakuu akhriyo
- Noqo akhriyaa qudhaadu

Dugsiga Dhexe: Qoraal, xisaab, xaadirid wanaag, iyo xirfadda daraasadda.
- Akhri oo kala sheekayso waajibaadka akhriska
- Baro waxa ay doonayaan macalimiinta ee qoraalka iyo xisaabta
- Ha lahaado ubadkaagu saaxiib ay isla daraaseeyaan islamarkaana usii qaada waajibaadka goorta uu dugsiga ka maqanyahay.
- Usamee shaqadda dugsiga ee guriga waqti u gaar ah
- Si cad ugu qeex tan la xidhiidha xaadiridda ee aad ka doonayso iyo waxa ka dhalan kara hadii uu fulin waayo
- Ardaydaadu ha helaan khibrad kala duwan, tusaale, beeralayda, dukaamadda iyo raacidda tareenka, si uu oga helo dunida.

Dugsiga Sare: Maadooyinka Ubucda ah, iyo howlo siyaadda ah oo la xidhiidha Manhajka
- Waydii dugsigga shuruudaha qalinjebinta, usamee liis maadooyinka laga doonayo ardaygaaga.
- Baro nakhtiinka iyo taageeradda laga bixiyo dugsiga ubadkaaga.
- Dhiiri geli falalka xoojinaya akadeemiyadda ubadkaaga, doodaha, riwaayadaha, ururadda ardayda, joornaalka, ciyaaraha, iwm
- Dhiiri geli ciyaaraha/falalka dhisaya asluubta, xaadiritaanka iyo caafimaadka.
- Xaadir ciyaaraha ardaygaaga iyo xafladaha.

In badan oo la xidhiidha qaababka barashadda ka eeg www.pps.or.us guji Milestones Framework oo ka hooseeya "Stay Connected".